



## SKOLJOGGEN (Rucleenta Dugsiga)

Sannad kasta qiyaastii 500,000 oo carruur iyo dhallinyaro ah ayaa ka qaybqaataan Skoljoggen, Munaasabada jimicsiga madadaalada ugu weyn ee Sweden ee carruurta iyo dhalinyarada. Skoljoggen waxaa laga diyaariyaa deyr kasta dugsiyada ku yaala wadanka oo dhan waxaana ku lug leh ardayda dhigata fasalka xannaanada ilaa dugsiga sare, kuwaas oo dhammaantood kaga qaybqaataan shuruudahooda, haddii ay doortaan inay ordaan, rucleeyaan, socdaan ama kaga qayb qaataan kursiga curyaanka. Skoljoggen ma aha tartan; Waa muujinta farxada firfircoonaanta!

## SKOLIDROTTSFÖRBUNDET (Ururka Ciyaaraha Dugsiga Swedish-ka)

Skolidrottsförbundet waxay qabanqaabisaa Skoljoggen, inkastoo dusiyadu aay yihiin kuwa iyaga laf ahaantooda u qabsada hawsha. Skolidrottsförbundet waxay qabanqaabisaa ururada ciyaaraha dugsiyada Sweden iyo xubnahooda. Ururka ciyaaraha dugsiga waxaa lagu sameen karaa dugsii raba in uu bixiyo hawlaha la heli karo oo joogto ah kuwaas oo qof kasta uu ka qayb qaadan karo. Ururka ciyaaraha dugsiga waxaa maamuli kara carruurta iyo dhalinyarada iyyaga oo caawimaad kahelaya qof weyn. Ururka ciyaaraha dugsiga oo firfircoon wuxuu abuuraa saaxiib-wadaag, dhaqdhaqaaq jireed iyo jimicsi, iyyada oo leh ka qaybqaadashada shuruudaha carruurta. Skolidrottsförbundet waxeey lee dahay in ka badan 1,000 ururo oo xubin ka ah.

## SPRINGSLANTEN (Deeq-bixinta iskaa ah)

Inta lagu jiro Skoljoggen, deeq-bixin iskaa eh ("Springslanten") ayaa laga soo ururiyaa ka qaybgalayaasha dhaxdooda, shaqaalaha dugsiga iyo waalidiinta. Inta lagu jiro 2017-2021 lacagaha laga soo xareeyo Springslanten waxaa lagu deeqi doonaa hay'ada aan faaiida-doonka ahayn ee Majaajileystayasha aan Xuduuda Lahayn.

Majaajileystayasha aan Xuduuda Lahayn waxay ka shaqeysaa inay ku faafiso qosol, rajo iyo riyooyin carruurta ku nool xaaladaha aadka u adag. Sannad kasta, Majaajileystayasha aan Xuduuda Lahayn waxay u dirtaa majaajileystayaal xirfad iyo khibrad leh, qoos fanneed iyo muusikeystayaal meelaha dunida ka mid ah oo ay noloshu adag tahay, si kor loogu qaado niyadda loona wanaajiyo kalsoonida carruurta iyo dhallinyarada inta badan u baahan taageero. Tan iyo billawgii 1996-di, fannaaniinta ka yimid Majaajileystayasha aan Xuduuda Lahayn ayaa la kulmay oo la qoslay in ka badan hal milyan iyo badh carruur dunida oo dhan. Si aad wax badan uga ogaato waxqabadyada caalamiga ah ee Majaajileystayasha aan Xuduuda Lahayn fadlan booqo: <http://www.cwb-international.org>

## Uruurinta deeqaha Springslanten

Dugsigaaga/Fasalkaaga ayaa ku deeqi kara lacagta aad ka soo xareesan Springslanten akoonada soo socda:

**Plusgiro:** 901126-3

**Bankgiro:** 901-126-3

**Swish:** 123-9011263

Lacagta ayaa si toos ah loogu shubi doonaa 90-akoon ee Skoljoggen.

U qor Skoljoggen sida qofka qaataha iyo magaca dugsiga sida diraha.